

Takoorka Guriyeynta

Takoorka guryuhu sharci daro ayuu ka yahay Menesota.

Marka loo eego Qodobka Xuquuqul linsaanka guriyeyntu waa “noocyada la ilaaliyo” (“protected area”). Waana sharci daro in si gooniya loola dhaqmo guriyeynta marka loo eego:

- Jinsiyad
- Midab
- Mabda
- Diin
- Halka aad jinsiyad ahaan ka timid
- Lab ama dhidig
- Inaad reer leedahay iyo in kale
- Heerka Qoysku taagan yahay
- La’xaad la’aan
- Taakulaynta Dadwaynaha
- Nooca aad tahay lab iyo dhidig ama wixii u dhaxeeya

Waxa kuwani loo yaqaan “noocyada la ilaaliyo.” Waxa jira kuwo laga reebo sida nooc kasta loo daboolayo marka loo eego Qodobka Xuquuqul lisaanka Menesota. Si aad wax uga sii baratid waxyaabaha la ilaaliyo iyo nooca dadka la ilaaliyo, akhriso *Xuquuqdaada*.

Tusaaleyaal la odhan karo waxay yihiin takoorka guriyeynta

Cadaalad darada ku salaysan guriyeyntu aad bay u dhacdaa. Laakiin fal kastaahi cadaalad daro ma aha. Waa kuwani tusaale yaal noqon kara takoorka guriyeynta sharci darada ah:

- Maamulaha guriyeynta oo kuula dhaqma si gaara waayo waxaad ku jirtaa taakulaynta dadwaynaha. Si aad u dalbatid guri waa inaad haysataa lacag afar jeer u dhiganta kirada. Dadka shaqeyta waxa kaliya oo looga baahan yahay kirada laba jibaarkeed.
- Ka daryeela gurigaaga had iyo jeer dayactir ayuu u sameeyaa dadka cad ee ka kiraysa guryaha intaanu u dayactirin dadka midabada kale leh.
- Qofka guriga leh oo ku yidhaa isagu/iyadu kaama kiraynayno waayo uur ayaad leedahay.
- Qofka guriga-le oo u diida inuu qof indho’li’l iyo xayawaanka u adeegaba ka kireeyo. Qofka guriga leh oo yidha, “Lama ogala xayawaan, xitaa dadka indhaha la.” (Xayawaanka adeega looma yaqaan xayawaan la haysto).
- Kuwa guryaha iibiya oo diida ay ku tusaan ama kaa iibiyaan guri waayo Maraykanka kumaad dhalan.
- Bangiga oo kaa qaada dulsaar dheeraada marka aad qaadanaysid guri maadaama aad haween tahay.

Maxaan ka qaban

Hadii aad u malaynaysid inaad tahay dhibane takoor:

- Qor wixii kugu dhacay hadii aad u malaynaysid inay cadaalad daro ahayd.
- Qor taariikhihii ay cadaalad daradaasi dhacday.
- Qor magacyada dadkii kale ee joogay.
- Qor wixii dadkii halkaasi joogay yidhaahdeen.

Ha baajin!

Mar marka qaarkood way adag tahay inaad garatid wixii takooro iyo wixii aan takoor ahayn – marxalad kastaaba waa gaar. Laakiin hadii aad umalaynaysid inaad tahay dhibane takoor, ha baajin.

Si deg deg aula soo xidhiidh Laanta Xuquuqul lisaanka Menesota. Waxaad haysataa sanad inaad dacwada ku xaraysid laga bilaabo kadib markii uu takoor ku dhacay.

Waxaan telefoonka ka jawaabnaa Isniinta – Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo

Telefoon

651-539-1100

TTY: 651-296-1283 (Dadka maqalku ku adag yahay)

Khadka bilaashka ah: 1-800-657-3704

Sidii loo heli lahaa turjumaan

Hadii aad u baahan tahay turjumaan si aad ula hadashid xafiiskayaga, waxaanu ku siin doonaa mid bilaasha. Waxaanu leenahay shaqaale naga tirsan oo ku hadla Af-Isbaanish iyo Af-Hamang.

Nala soo hadal adiga oo odhanaya, “I need a Somali interpreter.”

Uma baahnid balan inaad xafiiskayaga ka dhigatid si aad u soo booqatid

Waxaanu qaabilnaa dadka lugta ku yimaada 9:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo, Isniin - Jimce.

Ciwaankayaga

Minnesota Department of Human Rights

Freeman Building

625 Robert Street North

Saint Paul, MN 55155

Email address

info.MDHR@state.mn.us

If you are emailing the department about filing a charge of discrimination and do not receive a reply within five business days, please contact our intake unit by phone at 651-539-1100 (TTY 651-296-1283) or Toll Free at 1-800-657-3704.

Qoraalkani jawaab dhamaystiran uma'aha takoorka guriyeynta marka loo eego Qodobka Xuquuqul lisaanka Menesota.

The Minnesota Department of Human Rights wishes to acknowledge Precision Language Services' generous contribution of time and language translation expertise on this document.